Dr. Raaqib as-sarajaani

Turjumiddii Maxammed Cumar (Ashraf)

DHAMBAALADA DHALINYARADA

HORDHAC

Waxa uu soo fadhiistay agtayda: waa habeen dayaxu iftiimayo, waxa gubaya dareenka uu ku hayo arrinka inankiisa oo labaatan jir ah. Waxa uu igu yidhi “maxaan sameeyaa waa aan ku wareeray arrinkiisa? Waxa aan ugu warceliyay maxaad ula jeedaa ma waxa aad ka cabanaysaa in uu ka siibtay Diintiisii? Mise waxa aad ka cabanaysaa in aanu oogin waajibka salaada? ma waxa aad ka xun tahay in uu xun yahay xidhiidhka uu waalidkiisa leeyahay? Xagee ayuu dhibku kaa haystaa? Waxa uu iigu warceliyay isiga oo aad u kacsan yahay dareenkiisu, kasoo horjeedka sidii aan u sheegaayay, waxana uu igu yidhi “Diktoor anigu waxa aan ka cabanayaa in uu inankaygu yahay mid aad ugu dhaqma diinta! Waxa uu aad u dhexgelayaa in uu baadho xaraanta iyo Xalaasha. Salaadaha masaajidka ayuu ku ogaa. Wakhtigiisa ugu baddana waxa uu ku bixiyaa akhriska bugaag aad u waa wayn! waxa uu aad uga hadlaa qadiyadaha Falastiin, Suudaan iyo Shiishaan. Hadal iyo dhammaan diktoor waxa aad talo bixin iga siisaa sidii aan maankiisa uga bixin lahaa arrinkaas.” Ma diidaayo in uu tukado salaada, umana diidaayo in uu soomo, laakiin waxa aan doonayaa in uu u noolaado sida ay dhalliinyarada faciisa ahi u nool yihiin, oo iska ciyaaro sida dhallinyaradaas faciisa ah oo kale!

Talo isii diktoor. Talo ayaa igu baahday oo garan waayay wax aan ugu jawaabo tolow maxaan u sheegaa! oo aan ugu warceliyaa? Naftayda ayaan hoos ula faqay, si qoto dheer ilbidhiqsiyo ayaan maankayga rogrogay. ka dib waxa aan ugu warceliyay: waxa aan kugu la talinayaa in aad la fadhiisato inankaaga oo aad wax ka barato waxna ka dhagaysato waxa uu u qalmaa in wax laga barto oo wax laga dhagaysto! Badanaa aabayaal u baahan toosin iyo tusaalayn. Badanaa dhallinyaro garaadkoodu koobcay oo uu gartayna xikmad aanu gaadhin garaadka aabayaashood!

Waxa sii kordhay dareenkiisii mana uu fahmin saaxiibkay waxa aan u sheegaayo. Waxa uu iigu halceliyey “diktoor inankaygu muu dhaafin dhallinyaranimo waxa uu ku gudo jiraa da’da labaatanka. Intaas markii aanu is waydaarsanaya ayaan kacay wanan ka tagay, aniga oo dareenkaasi maankayga ka guuxaayo. Waxa aan ka tegay oo aan dhex galay oo aan dhex dhumbay oo aan galay afkaar. Waxa aan is waydiinayaa, tolow muxuu ula jeedaa Islaamku dhallinyaro? Maxay tahay kaalinta dhallinyaradu? Maxay sugayaan dhallinyaradu? Xagay u socdaan? Iyo su’aalo badan oo kale.

Dhiganahan dhambaalada dhallinyarada dhexdiisa ayaad kaga bogan doontaa idam alle warcelinaha waydiiimahaas oo dhan.

Dhibaatooyinka Dhallinyarada

Waxa aan ka qayb galay kulan aqoomeed ay soo qabanqaabiyeen qaar ka mida ah ardayda wax ka barata jaamacadda Qaahira. Hal ku dhiga kulanku waxa uu ahaa, “dhabaatooyinka dhallinyarada” waxa aan awood u yeeshay in aan afkaarta dhallinyaradaas uririn ku sameeyo. Waxa aan ka codsaday arday kasta in uu ii soo qoro dhibaatada ragaadisay noloshiisa, haddii uu ka buxi lahaana uu noqon lahaa qof faraxsan oo nolosha ku raali ah. Waxa ay soo qoreen dhabaatooyinkii noloshooda haystay, waxaan gudo galay in aan dib u fiirin ku sameeyo bal waxa maskaxda dhallinyaradan ka guuxaya ee ugu khatarta badan. Waxa aan qaatay dhammaan wixii ay dhallinyaradu ii soo qoreen. Waxa aan u taxay oo aan u habaystay sidii ay isugu mawduuca dhawahayeen. Waxa aan kala kulmay oo aan ka arkay wax iga yaabiyay!

Bal aynnu eegno dhibaatooyinka ay dhallinyaradaas ka cabanayeen. Qaar waxa ay ka baqayaan in ay shaqo waayaan marka ay dhammeeyaan marxaladda Jaamacadda. Qaar kale waxa ay Jecel yihiin in ay guursadaan se, waxa ay ka baqayaan in ay awood u yeelan waayaan wax yaabaha uu guurkoodu u baahan yahay. Qaar kale waxa ay ka Cabanayaan isku qasanka ragga iyo dumarka iyo waxa ka dhalan kara ee ah doonitaanada iyo dareenada dhallinyaranimo. Qaar kale waxay ka cabanayaan in ay xumaanta indhaha ka laaban karin. Qaar kale waxa ay ka cabanayaan manhajka waxbarasho oo ay sheegayaan in uu yahay mid faa'iido ka madhan. Qaar kale waxa ay ka cabanayaan cadada S**gada. Kuwo kale waxa ay ka cabanayaan jacayl dhinac qudha ka rarran. Koox kale waxa ay ka cabanayaan saboolnimo. Qaar kale waxa ay ka cabanayaan qabatinka cabista Sigaarka. Mid ka mida waxa uu ka cabanayaa in uu doonaayo in uu aabihii u iibiyo mid ka mida moobilada casriga ah (Smart phoneska) laakiin se, uu aabihii u diiday!

Tani waa dhibaatada ay sheeganayaan dhallinyaradan masaarida ahi. waxa se, aan muran ku jirin in ay tahay dhibaato ay ka mase yihiin dhallinyarada caalamka Islaamka dhammaantood. Waa dhallinyaro Jaamacadeed aqoon ayay leeyihiin waxa ay bixinayaan dadaal iyo Juhdi ay ku buxinayaan in ay ka qayb galaan kulumada lagu lafo guraayo aqoonta iyo ogaalka. Dhibaatadan ay sheegeen dhallinyaradu waa dhibaato ka dhalatay dhibaatooyinka is dulsaaran oo ay ka mid tahay ku dhaqan la'aanta shareecada Islaamiga ah oo aan lagu dhaqmin wadamada muslimiinta. Waxana ay ku tiirsadeen qawaaniin ay iyaga gacantooda ku dajiyeen bal ay dad aan dantooda ka shaqayn u soo dhoofiyaan. Waxa ay ka jeedsadeen ku dhaqanka kitaabka Qur'aanka ah iyo Sunnada Suubanneheenna Muxammad SCW.

dhibaatooyinka aad ka u ragaadiyay dhallinyarada caalamka islaamka waxa ka mida: Dhibka haysta dalal badan oo Islaam ah, oo loo adeegsado! waxa aan ula jeedaa hababka dulmiga ah, jidhdilka iyo dilka dalalkan la haysto ka dhaca. Waxa ka mida Falastiin, Ciraaq, Shiishaan iyo Afgaanistaan. Waxa kale oo aad u dilay dareenka dhallinyaradan, muuq dilka lagu hayo islaamka iyo dhulalka muslimiinta ee ay ku hayaan kuna tilmaamayaan warbaahinta afka dheer ee ay gacanta ku

hayaan dadka aan muslimiinta ahayn iyo dalalkooda iyo dantooda toona jeclayn. Sababaha keenay mooraal Jabka dhallinyarada muslimiinta waxa ka mida: dhibaatada lagu hayo wax yaabaha ay rumaysan yihiin sida in wareer lagu qaado Nabigeena wanaagsan SCW, oo ay dhaleeceeyaan gaaladu. iyo tun jilicsiga lagu hayo dadka muslimiinta ah, midaas oo lagu soo qoroya bogaga wargaysyada iyo majalaadka. Dhibaatooyinka dhallinyarada islaamka ah han-jabka ku riday waxa ka mida: in daymo lacageed dusha laga saaray dalalka muslimiinta ah badan kooda, midaas oo aanay awoodin in ay iska gudaan ahna wado lagu adoonsan karo. Waxa kale oo ka mida: wax yaabaha dhallinyarada muslimiinta ah han la'aanta ku sababay dhibaatada maamul xumada iyo musuqmaasuqa hufnaan la'aanta, tuuganimada, laaluushka, wax isdabamarinta iyo been abuurka ayaa dunida Islaamka ka dhigay halka ugu hoosaysa liiska dalalka aduunka. Baadhitaan lagu sameeyay dawladaha caalamka islaamka dhinaca maamul wanaagga iyo akhlaaqda toban dal oo keliya ayaa waxa ay heleen shan ka mid ah arrimaha akhlaaqda, maamul iyo daah-furnaan waxana ay kala yihiin dalka Malaysia (10kiiba 5.3), halka Tunisia ay heshay 5 ka mid ah 10kii, ka dibna dhammaan dalalka caalamka Islaamka guud ahaan waxay ku fashilmeen arrimaha ku saabsan anshaxa iyo daacadnimada!! (Innaga oo og in Israa'iil 10kiiba 6.8 ka heshay dhinaca anshaxa, hufnaanta iyo khiyaanada la'aanta!) 0.6% dakhligeeda ku buxisa hal-abuurnimada sayniska dakhliga qaranka, halka Israa'iil ay ku bixiso 2.4% dakhliga qaranka sayniska iyo horumarintiisa.

Waxa ka mida dhibaatada gaadhid la'aan islaamka dhul balaadhan oo aduunka ah iyo helista fac dhan oo aan maqal wax ka mida islaamka ama ka maqlay uun qab dilka islaamka iyo waji xumayntiisa, iyada oo laga rabay ummadda islaamka ah in ay gaadhsiiyaan wanaaga iyo khayrka agtooda yaala qof kasta oo aduunkan dul saaran.

Istaag! isna waydii su'aashan maxaa u dhaxeeya dhibaatadii dhallinyaradii masaarida ahaa ay ka cabanayeen iyo dhibaatadan aynu sheegnay in ay dhallinyarada calaamka Islaamka ku habsatay? Warcelintu waxay tahay dhibka ay sheegeen dhallintaasi waa mid ku kooban shakhsiyadooda, halka kuwan aynu xusnay yihiin dhibaatooyin guud oo dhammaan saameeyay dhallinyarada caalamka muslimka ah. Arinkaasi waxa uu inoo cadaynayaa in arin aad u khatar badan oo ah maqnaanshaha dareenkii ummadnimo ee dhalinyarada. Xalinta arrinkaas waxa uu

u baahan yahay dadaal iyo naf hurnimo badan, sababta oo ah waa qadiyad ka baxday maanka dhallinyarada islaamka una baahan sidii loogu soo celin lahaa oo dhallinyarada looga dhigi lahaa dhallinyaro dareen ummadnimo xanbaarsan kuna warwaraaya in xal u raadinta dhibaatooyin kan ka jira dhulaalka muslimiinta.

Su'aashu waxay tahay muxuu danayn wayn u siin waayay qofka dhallinyarada ah arrimahaa waa wayn ee ummadiisa?

Sida muuqata hadda dhallinyarada muslimiintu in yar oo rabigeen u naxariistay mooyee. Waxa ku dhacay xanuun aad khatar ah oo una baahan dawayn dagdag ah iyo danayn aad u wayn. Xanuunada ugu waaweyn waxa ka mida; in aanu u cadayn yool cad oo ay nolosha ka leeyihiin. Garan maayaan maxay tahay kaalinta aad ku leedahay nolosha iyo dhulkan. Waxa ka qarsoomay dhallinyarada yoolka ay noloshan ka leeyihiin, jeer ay noqdeen kuwa u haysta hadafka nolosha helista waxyaabo maadiyaadka nolosha ah, sida in aan haysto gaadhi iyo wax yaabo kale oo aan ahayn hadaf wayn oo nolosha macno wayn u samaynayn' innaga oo og in aanay ahayn waxyaabo xaraan ah haddana waxa dayacmay yoolashii waa waynaa oo waxa uu noqday hadafkan wari mid ay dhallinyaradu u arkaan in uu yahay mid loo marayo yoolka wayn ee nolosha midaasina waa masiibo. Xaal keenu waa

(نموت ونحيا} waxa ay noqdeen dhalinyarda islaamku badan koodba maanta kuwo ku mashquulsan conto iyo cabitaan, meelo qurux badan oo la dago iyo dheelista ciyaaro aan dhammaad lahayn. Markaas ayay noqotay mid ku dhex dhuntay mawjadahada badda waxa ay noqdeen kuwo isku arka in ayna ka fikiri karin arimaha ummaddooda wax ay arkeen wakhtiga ay joogaan in aanu ku suuban wakhtigii ay gorfayn lahaayeen dhibaatooyinka ummaddooda waxa ay isku arkeen kuwo aan ka gaaadhin wakhtigii ay qaadan lahaayeen masuuliyadda ummaddooda. Su'aasha qasabka ahi waxay tahay waa kuma qofka dhallinyarda ahi? Yaraantu midda cimriga miyaa mise waa mid kale? Marka la joogo dhinaca diinta islaamka cida ay dhalinyaro u taqaano waa qaybo. Mida ugu caansan waa in uu gaadho qofku da'da 15 jirka. Markaa qofku gaadho heerkaas waa qof mukallaf ah oo ay u bilaabatay in uu noqdo qof nafttisa masuul ka ah laguna xisaabinaayo gafkiisa loona qoraayo danbiga uu galo aakhiro iyo aduunkaba. Laakiin sida ay u aqoonsan yihiin

dawladaha qaramada midoobay waa ay ka gadisan tahay midaas. Qofku haddaanu gaadhin da'da 18-jirka uma yaqaanaan qof qaan-gaadha. Islaamku middaas waa uu ka gadisan yahay allah waa uu kula xisaabtamayaa falkiisa dhammaantiiba.

Dhallinyarada iyo Islaamka

Maxaa ka wayn kaalinta ay dhallinyaradu kaga jirto islaamka! Hahdii aynnu baadhno sooyaalka taariikheed ee islaamka waxaynu arkaynaa in is badaladii ka dhacay dhulka muslimiinta in ay sababeen gacmaha dhallinyardu. Middaasina waa xaqiiqo biyo kama dhibcaan ah. U noqo taariikhda oo fiirfiiri sooyaalka taareekheed muslimiinta, markii suubana Muxammad SCW, Waxyiga lagu soo dajiyay cidii ugu horraysay ee uu Rasuulku SCW uu u la jihaystay waxa ay ahayd dhallinyarada. Dhallinayaradu waxa ay ahaayeen cidii xanbaartay ee qaaday diintan waxa ay ahaayeen cidii is baddalka ku samaysay dhaqankii Makka ee beddashay nidaamkii iyo dhaqankiiba. Waxa ay ahaayeen cida badashay adduunkan isbaddalka kaa ka muuqda kana muuqan doona ilaa maalinta Qiyaame. Waxa ay ahaayeen facii ugu wanaaga badnaa ee aduunkan soo mara. Waxa ay ayaaheen cidii uu Rasuulku SCW: ku tilmaamay in ay yihiin dadkii iyo duulkii ugu fadliga iyo wanaaga badnaa ee soo mara dhulkan markii Rasuulku SCW: lahaa "Dadka waxa ugu khayr badan qarnigayga waxa kusoo xiga labada qarni ee kusoo xiga." Dhallinyaradii saxaabadu waxa ay ahaayeen cidii sanka dhulka u dhigtay madaxyo wayntii magaalada Maka, ee furtay dhufaysyadii reer Ruum iyo Faaris ee gilgilay carshigii Kisra iyo Qaysar. Dhallinyaroy u noqda akhriska sooyaalka taariikheed ee saxaabadii aduunka isbaddalka ka sameeyay.

Aynnu soo qaadano qaar ka mida saxaabadii dhallinyarada ahaa ee isbaddalka wayn ka sameeyey sooyaalka taariikhda.

Subeer Ibnu Cawaam Rc.

Geesigii iyo halyaygii naftii hurihii Rasuulka SCW. Waa geesi ka mida geesiyada diintan islaamka dhidibbada u taagay. Subeer Ibnu Cawaam imisa jir ayuu ahaa markii uu qaatay Diinta Islaamka? Waxa uu ku jiray da'da toban iyo shan jirnimada. Haddii uu noolaan lahaa wakhtigeenan wuxuu noqonlahaa mid ku jira dugsiga sare dhinaca heerka waxbarashada sida ay yihiin dhallinta wakhtigan nooli. Haddii aynnu isbarbar dhig ku samayno Subeer iyo qofka dhallinyarada ah ee nool xilligeenan halkee ayay kala joogaan! Ninka dhalinyarada ah ee nool maanta halkaas ma gaadhsiisan yahay fikirkiisu? Hammiga intaas leeg ma xanbaarsan yahay? Waxa lagama maarman ah in aynu ogaano halkee ayay dhibtu ka jirtaa? Qofka dhallinyarada ah ee nool wakhtigeenan waxa ka guuxaaya maankiisa ee uu ku bixiyaa wakhtigiisa waa dhagaysiga heesa liita, daawashada filimada macno la'aanta ah. Waxa ay saacado badan ku bixiyaan daawashada filimada, waxa ay wakhti badan ku bixiyaan dheelista ciyaaro aan faa'iido badan lahayn. Laakiin se, hal saac uma huraan kuma bixiyaan oo wakhtigooda ka mida u fikirka diintooda!

Dalxa Ibnu Cabdillahi RC

Mid ka mida madaxdii dacwada magaalada Maka. Waa

geesi ka mida geesiyada dhidibada u taagay fariinta islaamka, kuna faafiyay magaalada Maka. Waa mid ka mida deeqsiyada maalkooda u huray jidka alle. Waa saxaabigii Rasuulku SCW Ku tilmaamay adoonkii wanaaga, saxaabiga mugaas iyo meeqaamkaas leh waxa uu ahaa markuu islaamay 16-sanno jir.

Sacad Ibnu Abii Waqaas RC

Waa saxaabigii geesiga ahaa. Waa Qofkii ugu horreeyay ee dhiig u daadiya islaamka, waana midkii uu Rasuulku SCW kulahaa maalintii duulaankii Uxud “gan falaadha yaa Sacad Aabahay iyo hooyaday lagugu furaye”! Waa midkii uu ku tilmaamay Cali Abii Daalib, “Sacad waxa la jeclaysiiyay dacwada iyo wanaagga.” Ninka wanaagaa leh ee islaamka wanaaggaa u qabtay waxa uu islaamay isiga oo ah 10-sanno jir ah!

Arqam Ibnu Arqam RC

Waa saxaabiga uu magaciisu u xanbaarsan yahay xusuusaha waa wayn, qof kasta oo muslim ah, waana saxaabigii ku marti galiyay gurigiisa dacwada Islaamka iyada oo ay marti galintaasi aad u dhibaato badan tahay. 13 sano ayuu gurigiisu u ahaa muslimiinta xarunta ay ku kulmaan, iyaada oo ay marti galintaasi joogto ahayd. Iyadoo aynnu og nahay in uu ka soo jeeday qabiilada reer Banii Makhsuum waana qabiilo ay xifaaltan badani ka dhaxeeyay reer Banii Haashim, iyada oo ay sidaasi jirto haddana waxa uu gurigiisa ku marti qaaday Nabiga oo ah Reer Banii Haashim. Iyada oo ay arintaasi dhibaato ku noqon karto Arqam oo haddii ay ogaan lahaayeen madaxdii reer kiisu ay dhibaato wayni kasoo gaadhi lahayd. Ragga madaxda u ahaana wax ka mida Abuu Jahal oo ah Fircoonkii Ummaddan. Hadda umuu joojin ee waxa uu qaatay go’aankaas geesinnimada leh islaamka dartiis. Imisa jir ayuu ahaa geesigaasi? Waxa uu ahaa markuu islaamay 16 sanno jir.

Marka aynnu akhrinaayo magacyadaas ku waaray taariikhda waxa maankeena kusoo dhacaya in ay ahaayeen rag waa wayn. Laakiin se, waxa ay ahaayeen rag yaryar da’ahaan laakiin se, waa garasho waynaayeen, dadaal ahaan, iimaan ahaan, akhlaaq ahaan. Waa dhallinyaro han iyo himilo lahaa isu arkayna in ay aduunkan isbaddal dhaba ka samayn karaan.

Cali Ibnu Abii Daalib RC

Maxaad ka ogtahay Cali Ibnu Abii Daalib. Waa inankii yaraa ee rasuulku scw, isiga oo da’da 10 sanno jirka ku jira uu u bandhigay diinta sidaasna ku islaamay! Inankaa yar ee aananba gaadhin da’da qaangaadhnimo hadda waxa uu weeleeyay garaadkiisu dhacdooyin waa wayn. Wax uu ka fikiray waxyiga. Waxa uu ka fikiray Nabinimada. Waxa uu fahmay maalinta Qiyaame. Waxa uu ka fikray isa soo saarka. Waxa uu weeleeyay dhammaan arrimahaas isiga oo ku jira da’da taban sanno jirka. Waxa uu isu taagay isiga oo da’daa jira in uu qariyo sirtii muslimiinta iyo ta Nabiga SCW. Waxa uu ka qariyay dadkii dad ugu dhawaa. Waxa uu fahmay in kaligiis cibaadaysto uu qur’aanka akhristo isiga oo iska dhawraaya indhaha dadka kale, waayo waxa lagu jiray marxaladdii ay dacwada islaamku sirta ahayd. Aabayaasha iyo barayaasha badhkood waxa ay ku barbaariyaan ubadka in ay uga sheekeeyaan oo ay ugu hoga-tusaaleeyaan oo ay baraan magacyada dad aan nolosha macno balaadhan ku lahayn. Iyaga oo heli kara in ay uga sheekeeyaan Cali Ibnu Abii Daalib iyo qisooyinkiisa macaanka iyo macnaha xanbaarsan ee uu sameeyay. Mid kasta oo ka mida saxaabada nolosha macno ayay u lahayd. Waxa uu lahaa han iyo himilo.

Sayid Binu Thaabid RC

Waxa aad arki doontaa riyooyinka wiilkan yar ee aan dhaafin da’da 13 sanno jirnimada. Waxa uu ahaa mid jidh ahaan u da’da yar se, isiga oo sidaas ah haddana waxa uu si dhammaystiran ugu fikiraayay ummadda islaamka. Waxa uu maqlay inankan yari ciidankii muslimiinta oo u baxaya duulaankii Badar waxayna gilgishay qalbigiisa. Waxa ay dhaqaajisay dareenkii u hayay diinta. Waxa uu soo qaatay seeftiisii ogow seeftu waa ayba ka dheertahay joogiisa! Waxa uu dhexgalay ciidankii muslimiinta waxa uu u socdaa in uu xaqiijiyo oo u dagaalamo dar Alle oo uu la kulmo

cadawga muslimiinta una gargaaro diinta islaamka oo uu u dulqaato dhibaatada ka dhalanaysa ee dhaawac iyo dhimashaba leh, si ay u kor noqoto ummadda islaamku. Waxa uu la kulmay si lama filaana arrin kale. Rasuulka SCW ayuu kula kulmay ciidanka dhexdiisa. Rasuulkuna SCW waxa uu arkay in uu yahay mid da' yar waana uu celiyay. Rasuulku SCW kama uu aqbalin in uu ka qayb qaato dagaalka. Sayid Binu Thaabid waxa uu ku laabtay hooyadii Nawaara Bintu Maalik isigoo ooyaaya oo murugaysan. Sayid waxa uu u sheegay hooyadii in uu Rasuulku SCW kasoo reebay dagaalkii. Sayid Binu Thaabid hooyadii waxa ay ahayd hooyo garaad badan waa ay dajisay waxayna ku tidhi: ha murugoon waxa suurta gal ah haddii aad awoodi wayday in aad islaamka ugu adeegto jihaadka. Waxa aad awoodaysaa noocyo kale. Waxa aad ugu dagaalami kartaa carabkaaga iyo qalinkaaga." Waxa ay u sheegtay hooyadan garaadka badani in uu xiftiyo qur'aanka. Waxana uu bilaabay in uu barto qur'aanka. Ugu dambaynna waa uu bartay qur'aanka, waxana uu xiftiyay 17 suuradood. Intaas ka dib waxa ay u gaysay hooyadii Nabiga SCW waxa ay ku tidhi "Yaa rasula allah: kani waa Sayid waxa uu xiftisan yahay 17 suuradood oo qur'aanka ka mida ah. waxana uu u akhrinayaa sidii laguugu soo dajiyay. Waxa uu jecel yahay in uu kula joogo waxna kaa barto," waanad ka dhagaysan kartaa hadaad rabto. Waa uu ka dhagaystay Rasuulku SCW, waxa uu soo bandhigay hibadiisa wanaagsan ee xiftiga ah. Waxa uu ka dalbaday Rasuulku SCW malaha wax haddii laga dalbilahaa midkeen sannado ku qaadan lahyd. Waxa uu ku yidhi Nebigu SCW "Waxa aad barataa luuqada afka yuhuuda (Hebrew)! iyada oo looga gol lahaa dano siyaasadeed oo dan u ahaa dawladdii islaamka ee wakhtigaa dhidibada loo taagayay. Waxa uu bilaabay Sayid barashada luuqadaa, waana uu bartay wakhti yarna waa kaga soo dhalaalay, isiga oo ku hadlikara waxna ku qori kara sida dadka u dhashay oo kale. Sidaas darted waxa uu noqday turjumaankii dawladdii islaamka, isiga oo aad u da'yar oo jira 13 sanno oo qudha! Rasuulku SCW waxa uu ku aaminay qorista waxyiga qur'aanka waxana uu qorijiray dhawrka suuradood ee kusoo dega Rasuulka. Wakhtigii ayaa socday Rasuulkiina waa geeriyooday ummaddii islaamkana wax ka bakhtiyay nuurkii ay iftiin sanaayeen. Waxa ay ka cabsadeen in la waayo qaybo qur'aanka ka mida waayo qur'aanku muu ahayn mid ku qoran meel qudha. Cumar Ibnu Khadaab waxa uu kula taliyay imaamkii muslimiinta Abuu Bakar in uu urruriyo qur'aanka si ayna u dayacmin qaybo qur'aanka ka midi. Wada tashi ka dib waxa uu Abuu Bakar u xilsaaray qorida qur'aanka Sayid. Sayid waxa uu ogaa

aayad kasta marka ay soo dagtay meesha ay kusoo degtay iyo sababta ay usoo degtay. Waxa uu ururiyay isiga oo da'ahaan 21 sanno jira. Waxa uu yidhi Sayid isiga oo ka hadlaya arrinkaas "haddii lay dhihilahaa buuraha Makka rar ayaa iiga fududaan lahayd urririnta qur'aanka!" Waa uu ku guulaystay hawsha intaas leekayd. Dhab ahaan maxaa ka wayn awoodda dhallinyaranimo haddii siday tahay looga faa'iidaysto.!

Camar Mucaad iyo Macawid Ibnu Cafraa RC

Waa laba wiil oo dhallinyara ah oo hammi wayn leh midka koobaad waxa uu jiraa da'da 14 sanno, halka midka labaadna uu jiro 13 sanno. Waxa ay ka qayb galeen dagaalkii Badar waxa ay u muuqdeen rag ka qayb qaadan kara dagaalka sidaas darteed Rasuulku SCW umuudiidin in ay ka qayb qaataan. Sidii uu Sayid Ibnu Thaabid ugu diiday oo kale labada wiil ee sidaas u da'da yar hammigoodu aad ayuu u waynaa. Bal aan dhuganno oo aynnu dhagaysano Cabdiraxmaan Ibnu Cawf oo innooga warbixinaaya sidii ay maalintaas wax u dhaceen. Waxa uu yidhi Cabdiraxmaan Ibnu Cawf "aniga oo kujira safka dagaalka waxa aan ku arkay dhinacayga bidix laba oo wiil oo aad u da'yarayar waxa aan aad ula yaabay dagaalkan aad ka u khatarta badan ee ay kasoo qayb galeen. Mid Ka mida ayaa ii soo dhawaaday isiga oo iska qarinaya saaxiibkiisa kale Mucaad Ibnu Camar oo kamida ah reer Madiina. Waxana uu igu yidhi "Adeer waxa aad itustaa Abuu Jahal!" Abuu Jahalna waa hoggaamiyaha Quraysheed ee dagaalka, kula jirta muslimiinta waana mid ka mida ragga ugu awooda badan magaalada Makka waana fircoown kii ummaddan. Waxa aan aad ulayaabay wiilkan yar ee doonaya inuu u babac dhigo ninka noocaas ah. Waxa aan waydiiyay adeer maxaad ku falaysaa ninkaas? Waxa uu iigu warceliyay "Adeer waxaan maqlay in uu Rasuulka caayo maanta meeshan ka tagi maayo ilaa aan seeftayda madaxa kaga jaro". Waligii muu arag Abuu jahal se, waxa uu aad dhibsaday warka sheegaaya in uu Rasuulka SCW wax ka sheeg. Waxa aan tusay oo aan farta ugu fiiqay Abuu Jahal oo dhex socda dadka. Waxana aan ku idhi "wakaas ninkii aad iwaydiinaysey" waxa ay u baratameen oo ay u kala dheereeyeen sidii ay uga takhalusin-lahaayeen ninkaas Rasuulka wax ka sheegay. Waxa uu yidhi Mucaad Ibnu Camar "waxa aan dhexgalay

gaaladii waxa aan maqlay iyiga oo isku leh ka ilaaliya Abu Xakam yacnii Abuu Jahal ayayna soo gaadhin qof muslimiita ka mideye. Waa aan u soo dhawaaday waxa aan kaga dhuftay seeftaydii dhudhinka cagta waana uu dhawaacmay.

Macawadna dhulka ayuu ugu tuuray Abaa Jahal fircawnkii ummaddan. Isiga oo dhaawac liita ah ayaa waxa dulyimi Cabdullaahi Ibnu Mascuud nafta ayuuna dhaafiyay. Waxa ay u yimaadeen Rasuulka SCW mid kasta isaga oo sheeganaya in uu dilay Abuu Jahal.
Rasuulku waxa uu ku yidhi: miyaad ka masaxdeen dhiigii seefihiina?
“Waxa ay yidhaahdeen maya.”
“Waxa uu ku yidhi Rasuulku SCW: ii kaana. Waana ay u keeneen. Rasuulku SCW waxa uu ku yidhi: Labadiinuba waa aad disheen.

Waa kaas hammigii dhallinyaradaasi iyo tartankay ugu jireen difaaca diintooda iyo ummaddooda.

Usaame Ibnu Sayid RC

Usaame waxa uu ka mid yahay dhallinyarada taariikhda islaamka baalka dahabka ah ka galay. Dhammaanteen waxa aynnu ka dherag sannahay mawqifkii aad u waynaa ee uu sameeyay Usaame dagaalkii dhexmaray Muslimiinta iyo Roomaanka. Inta aynaan ka faaloon dagaalkaas ma’aha Sayid markii koobaad ee uu ka qayb qaato duulaanadii ay muslimiintu la galeen gaalada waxa uu ku lahaa kaalin wayn, oo uu kaga qayb galay furushadii Makka isiga oo da’ahaan jira 14 sanno. Usaame waxa uu ahaa shakhsiyaad mug iyo miisaan ku dhex leh saxaabada heer ay gaadheen saxaabadu haddii ay Rasuulka SCW wax ka doonaan in ay Usaame u sii mari jireen. Waxa uu ka qayb galay Usaame duulaankii **Muraysiic** waana duulaanka ay ka dhacday dhacdadii been abuurka ahayd ee loo gaystay hooyadeen Caa’isha RC ee ay hoos ka gaaladu (manaafiqiintu) ku sheegeen in ay samaysay xumaan, dhacdadaa oo uu aad uga murugooday Rasuulku SCW isiga oo aan bil dhan aan wax qur’aan ah soodagin. Waxa uu galay Rasuulku SCW, xaalad aad u adag waxana uu la tashaday labo ka mida asxaabtiisa oo kala ahaa Usaame Ibnu Sayid iyo Cali Ibnu Abii Daalib. Waxa aad halkaa ka dareemaysaa heerka uu ka joogay Usaame

Rasuulka SCW agtiisa iyaga oo ay joogaan saxaabadii ka waa waynayd. Haddana waxa uu kala tashanayay Rasuulku SCW qisadan aadka u xanuunka badan ee ay ku been abuurteen sharafta hooyadeen Caa'isha allah haka raali noqdee iyada oo allah qur'aan ku bari yeelay. Waxa uu Rasuulku SCW intii aanu dhiman uu dhiibay in uu hoggaamiyo dagaalkii muslimiintu la galeen Ruum waxa uu hoggaamiye ka ahaa dagaalkaas isiga oo 18 sanno jir ah. Waxa ku jiray dagaalkaas halyayo geesiyaal naftood hurayaal, sooma jeestayaalka ku caan baxay xeeladaha dagaalka. Waxa ku jiray raggii islaamnimada uga soo horeeyay. Haddaba, su'aashu waxay tahay muxuu Rasuulku SCW ugu dhiibay hoggaanka dagaalkaas Usaame? Miyayna joogin Madiina rag ka fadli badan Usaame? Jawaabtu waa iska caddahay wayna iska muuqataa Madiina waxa joogay rag ka fadli badan oo ay ka mid yihiin Cubayda Ibnu Jaraax, Khaalid Ibnu Waliid, Subayr Ibnu Cawaam, sababta uu Rasuulku SCW uga hormariyay Usaame waxa ahayd in uu doonayay in uu muujiyo kaalinta ay dhallinyaradu ku leeyihiin islaamka iyo in lasoo bandhigo awoodooda. Waxa uu awood u yeeshay Usaame in uu hogaamiyo dagaalkaas ay ku jiraan ragga geesiyaal ah. Dagaalkaas aad u culus waxa aynnu ka qaadananaa ciidankaas uu hogaaminayay Usaame umuu soo bixin arrin yare e waxa uu u soo baxay in dagaal uu la galo dawladii wakhtigaas ugu xooga badnayd adduunka. Rasuulku SCW waxa uu ogaa in uu hoggaamin karo dagaalkaas awoodna u leeyahay kasoo bixidda xilkaas aad u wayn. Usaame waxa uu ahaa mid leh tobabar ciidan, fardo fuulnimo, awood hoggaamineed iyo mid maamulba. Innaga oo og ninkaas dhallinyarada ah muu ahayn sida ay yihiin dhallinyaro badan oo maanta nool oo hammigoodu yaha xaqiijinta hadafyo yaryar oo aan macno buuran u samaynayn nolosha. Waxa uu ahaa nin nolol caadiya isiga nool Aabihiis. Waxa uu ahaa adoon uu Rasuulka SCW uu xoreeyay, oo lagu kala iibsado suuqyada, Usaame muu ahayn nin kasoo jeeda qoys ladan ee waxa uu kasoo jeeday qoys danyar ah manuu dhallin nin Amiir ah. Manuu ahayn nin qurux badan ee waxa uu ahaa nin kusoo koray nolol saboolnimo ah. Halkaas waxa innooga muuqanaya in aynna nolosha wax macno buuran ah u samayn in aad tahay hodan ah iyo in aad sabool tahay midna ee hammiga aad leedahay iyo in aad ku qanacsanaanta diintaada iyo inta ay leegyahay hammigaaga diimeed ay nolosha macno u samaynaya. Kumuu gaadhin Usaame qabiil iyo maal toona waxa uu yidhi Rasuulku SCW. بعث النبي صلى الله عليه وسلم:بعثا وامر عليهم اسامة بن زيد فطعن بعض الناس في إمارته, فقال النبي صلى الله عليه وسلم:"ان تطعنوا في إمارته فقد كنتم تطعنون

في إمارة ابيه من قبل وايم الله ان كان لخليفا للإمارة وإن كان لمن أحب الناس إلي وإن هذا لمن أحب الناس إلي بعده:

“Rasuulka SCW ayaa diray Usaame Ibnu Sayid isigoo amiir ka ah dagaalka. Qaar ka mida ayaa waxa ay dureen oo ay wax ka sheen amiirnimada Usaame markaas ayuu Nabugu yidhi” haddii aad wax ka sheegtaan waxa aad wax ka sheegteen Aabihiis alle ayaan ku dhaartee Usaame waxa uu ka mid yahay dadka aan dadka ugu jecelahay.” Halkaas waxa innoga cadaanaaya booska ay ka joogeen dhallinyaradu islaamka, kor u qaadkii islaamka iyo ummadda muslimiintaba.

Maxaynu ku kala duwanahay?

Waa in aan si dhaba isuwaydiino maxay u kala duwanahay? Maxaa ku kala duwan tahay taariikhda aan soo aragnay iyo midda aan maanta ku dhex nool nahay? Halkee ayay ku jirtaa dhibaatadu iyo dibu dhaca ummadda islaamku?

Waa dhibaatooyin isdulsaaran. Dadka qaar waxay khaladka saaraan dhallinyarada oo qudha se, laakiin waa dhibaatooyin isdulsaaran oo ay sababeen dhibaatooyin ku habsaday ummadda islaamka ah……waxa ay u baahan tahay dhibaatada baadhitaan xeeldheer oo aynnu ku raadinano xalka dhibaatadan. Doonimayno in aynnu ku lumino wakhti badan iswaydiinta su’aalahan laakiin waxaynnu xusi doonaa qaar ka mida wax yaabaha sababay dhabaatooyinkan.

Sababta1AAD: Maqnaanshaha barbaarintii islaamka

Maqnaashaha barbaarinta islaamku, waa mid ka mida sababaha keenay dib u dhaca kaalinta dhallinyarada. Waa sababta keentay in ay ka hoos maraan booskii ay mudnayd in ay ka galaan nolosha. Raggii aynnu soo xusnay waxa gaadhsiiyay booska iyo kaalinta ay ku lahaayeen kor u kaca baaqa islaamka waxa sababay waa in ay ku barbaareen tarbiyada islaamka. Barbaarinta islaamku waa midda samaysay Usaame. Waa midda samaysay Camar Ibnu Cafraa. Islaamku waa midka soo burqiyay awooddii dunida is baddalka ka samaysay. Islaamku waa midkii raggaa taariikhda baalka ee dahabka ah ka galay soo saaray. Ummadda islaamku waxa ay noqotay waayahan aynu nool nahay mid ka luntay jidkii iyo wadadii alle u jeexay si ay adduun iyo aakhiraba u guulaystaan. Dhallinyarada iyo faca koroya hadda waxa lagu barbaariyaa tobanaan Manhaj oo aan ahayn midka islaamka markaas ayay

ummaddu wayday sirtii guusheeda waxa ay ka luntay wadadii hanuunka iyo wanaagga, markaas ayay ku noolaatay nolol ciidhidhiya, oo ah midduu allah qur'aanka ku xusay.
(ومن أعرض عن ذكري فإن له معيشة ضنكا)
"cidda ka jeedsata xuskayga waxa u sugnaatay nolol cidhiidhi ah."

Kuma ay dadaalin tarbiyada iyo barbaarinta garab marsani islaamku in ay soo saarto, fac dareensan oo ku baraarugsan in markasta iyo meel kastaba in uu allah daalacanayo falkasta oo ay samaynayaan. Waxa ay soo saartay fac iska dhawra indhaha macalinka iyo waalidka, oo aan iska dhawrin isha allaha oo arkaysa lana socota xilli iyo xaalkasta oo ay ku sugan yihiin. Haddii ay ka qarsoomaan indhaha dadka waxa ay samaynayaan wax kasta oo ay jeceshahay naftoodu awoodooda oo dhan waxay u adeegsanayaan in ay dumiyaan Jiritaanka ummaddooda badalka xagii ay ka dhisilahaayeen. Waxa ka dhashay markii lagu barbaariyay manaahijtaas aan ahayn midda islaamka in ay faca koraya ee islaamku ay noqdeen kuwo aan dareen iyo xidhiidh adag aan la lahayn kitaabka qur'aamka iyo sunnada Rasuulka SCW. Qur'aankii waxa uu noqday maado ka mida maadooyin lagu qaato goobaha Waxbarashada.

waxana ay ka madhan yihiin maadooyin lagu bartaa koobaha Waxbarashadu Barbaarinta iyo in ay soo saaraan qof muslim ah oo dhan walba ka dhisan. Middaasina waa: ilaa Heer Jaamacadeed. Uma jeedno in aynnu ku barbaarino faca koraya iyo dhallinyarada in ay ka dheeraadaan adduunka oo ayna ka shaqaysan. Waxa aan u jeednaa in aynnu saxno fahanka ay ka haystaan adduunka, oo ay ogaadaan in uu allah markasta ka war qabo xaal kooda uuna yahay midka adduunkan oo dhan iska leh maamulana. Kuna tasarufa oo kolba sida uu doono u gadgadiya uuna yahya allaha nool nolol aan xad iyo xuduud midna lahayn, nool nolol aan dhammaad lahayn. waa in ay dareemaan dhallinyaradu in aynna cidka ka qarsoomin karin isiga oo ay hagaajiyaan gudahooda, sida ay u hagaajinayaan intooda muuqata oo ay u shaqaystaan maalinta aynna murugadaaan waxba tarin oo ay allah caabudaan iyaga oo aan marna ka daalayn in allah raali galiyaan.
Waxa lagama maarmaan ah in aan is waydiino, muxuu allah ii abuuray? Iswaydii mar labaad su'aashan! Sida aad uga jawaabto su'aashan ayuu ku xidhan yahay masiirka noloshaada adduun iyo aakhiraba. Malaayiin dhallinyaro muslimiin ah isma waydiiyaan su'aashan. *Allah waxa uu ku leeyahay qur'aanka*
(أفحسبتم أنما خلقناكم عبثاً وأنكم إلينا لا ترجعون}
"ma waxa aad u malaynasaan in aan idiin abuurnay dheeldheel oo aan xagaya laydiin soo celin doonin." Ma waxa uu allah inoo abuuray in aynu iska raaxaysano

adduun? Mise waxa laynoo abuuray in aan iska shaqaysano oo qudha oo aan xoolo Ururso? Mise waxa laynoo abuuray in aan allah casino oo aan amarkiisa jabino? Waxaas oo dhan allah inoomuu abuurin e, waxa uu inoo abuuray yool cad oo aan qarsoonayn. uma suubanto Allah xikmada badan in uu inoo abuuro arrimahaas liita. Allah waxa uu ku cadeeyay qur'aanka u jeedka ka danbeeyay in Ibnu Aadanka aduunkan la keeno. Bal u fiirso

Alla waxa uu inoo abuuray u jeedo cad oo ah in aan isiga oo qudha caabudno sida uu Allah qur'aanka ku cadeeyay.

(وما خلقت الجن والإنس إلا ليعبدون)

"umaan abuurin Jin iyo insi in ay I caabudeen mooyee wax kale." Haddii aanad xaqiijin u jeedadaa aduunka laguu keenay maad xaqiijin u jeedadii aad aduunka u timid. Cibaadada macnaheedu waa in aad Allah si dhaba ugu hogaansanto qawl iyo ficil labadaba, adiga oo Allah jecel qaadanayana Amarkiisa xaalad kasta oo aad ku sugan tahay iyo meel kasta oo aad joogto, lagana dareemo hab u dhaqankaaga, akhlaaqdaada, iyo dad la dhaqan kaaga, markasta in aad Allah amarkiiisa qaadanayso goob kasta iyo goor kastaba; haddii aad caafimaad qabto, hadaad bukaam tahay, haddaad dagan tahay, haddaad safar tahay. Cibaadadu maaha Salaad, Soon, Sako, iyo Xaj qudha; intaasi waa inta ugu waa wayn, mana'aha in aad Allah sannado badan caabudasay ee cibaadadu waa nolosha oo dhan. Marka cibaado laga hadlo dadka badan kooda waxa kusoo dhaca eayaabo gaara iyo wakhtiyo gaara, fahankaasina waa faham qaldan ee cibaadadu waa goor kasta iyo goob kasta, kumana koobna meelo gaara sida masaajida. Alle inoomuu abuurin in aan dayacno wakhtigeena qayb ka mida, dhammaan wakhtigaasna waa laynaga xisaabimayaa, wax kasta oo aan samaynayna waan arkaynaa. Allah waxa uu qur'aanka ku leeyahay.

(فمن يعمل مثقال ذرة خيراً يره, ومن يعمل مثقال ذرة شراً يرة)

"Qofka sameeya wax ili Qabato waxa leeg oo wanaaga waa uu arkayaa, sidaasoo kale midka sameeya intaas in leeg oo xumaanana waa uu arkayaa." Allah waxa uu inaga xisaabinayaa maalinta Qiyaame wax kasta oo aan samaynay, haddii ay wanaag yihiin, wanaag ayaa laynagaga abaalinayaa. Wax kasta oo aad ku hadashay intii aad qaangaadhka ahayd waa laguu qoray dhammaan.

(وقالوا مال هذا الكتاب لا يغادر صغيرة ولا كبيرة إلا أحصاها)

"waxa ay odhan doonaan danbiilayaashu maalinta qiyaame: waa maxay kitaab kan aan waxba ka tagine ee wax walba koobay! Wax kasta oo ay shaqaysteen waa ay helayaa." Ilbidhiqsi kasta oo aad Adduunka joogtay waxa lagaa waydiinayaa su'aal. Allah waxa uu leeyahay isiga oo la hadlaya Rasuulka SCW,

(قل إن صلاتي ونسكي محياي ومماتي لله رب العالمين)

“waxa aad tidhaahdaa Nebbi Muxammadow salaadayda, gawracayga, noloshayda, dhimmashadayda, waxa ay u sugnaatay oo iska leh Allah oo ah rabbiga caalamka oo dhan.” Waxa habboon oo ay tahay in aan nolosheena oo dhan u jahayno dhinaca allah, oo wax kasta oo aan qabanayno aan u qabano dar alle, haddii aad nooshahay dar ulle u noolow. Haddii aad shaqaynaso dar allenimo u shaqayso. Aayaadka iyo Axaadiista kusoo aroortay mawduucan aad ayay u badan yihiin lama soo kaabi karo. Qofna qof kale ka Qaadi maayo waxa uu shaqaystay ee adiga ayaa lagaa xisaabinayaa (كل نفس بما كسبت رهينة)
“Naf kasta: waxa ay u xidhantahay waxay camal fashay.”
Cidna maalintaas dhinacaaga ma taagna waalid iyo saaxiib toona.
{ولقد جئتمونا فرادى كما خلقناكم أول مرة} Alle waxa uu inna leeyahay *“Waxa aanu idin keeni doonaa idinka oo kali kali ah sidii aanu idiin abuurnay markii horaba.”* Ilbidhiqsi kasta oo ka dayacanta noloshaada waa lagaa xisaabinayaa. Waa in aad wakhti kasta ogootaa in Allah ku jeedo danbiga aad samaynayso cidina kaa qaadi mayso,
[وقال الذين كفرو للذيت امنوا إتبعوا سبيلنا ولنحمل خطاياكم وما هم بحاملين من خطاياهم من شيءٍ إنهم لكاذبون]
“waxa ay ku yidhaahdeen kuwii gaaloobay, kuwii alle rumeeyay wadadayada soo raaca aanu dusha u ridano danbigiina e, mana aha kuwa danbugooda dusha u ridanaya waxba, waana beenaalayaal.” Kuwa kuugu yeedhaaya fasaadka iyo dariiqooyinka xumaanta danbigaaga waxba kaa qaadi mayaan, adiga ayaa lagu xisaabinayaa maalinta qiyaame. Alle waxa uu ku siiyay garaad aad ku kala garato wanaaga, xumaanta iyo awood aad waxna ku dooni karto, waxna ku diidi karto. *Allah waxa uu leeyahay {وهدينا النجدين] “waxa aanu ku hadeynay labada wado midka wanaaga iyo midka xumaha.”* Haddii ay dhammaatay dhallinyaranimadaadi adiga oo ka fog jidka saxan ee aanu allah ka raalida ahayn oo aad ku qarqoontay, oo aad ku haftay mawjadaha macaasida, oo aanad wax yool ah ka lahayn noloshaada. Dabadeedna allah kugu soo hedeeyay wadada wanaaga iyada oo ay dhammaatay dhallinyaranimadaadi qayb ka mida amaba dhammaanteed. Ayaa kuu soo celinaya?!

Waa sunnaha nolosha in aynna soo noqon qayb ka mida noloshaadii oo dhammaatay. Ka faa’iidayso dhallinyaranimadaada. *Waxa uu Rasuulku SCW xadiis ku leeyahay, “shanka faa’iidayso inta aanay shan kugu iman 1. Dhallinyaranimadaada ka faa’iidayso inta aanad gaboobin*
2. Caafimaadkaaga ka faa’iidayso inta aanad xanuunsan
3. Hoddantinimadaada ka faa’iidayso in aanad sabool noqon
4. Firaaqadaada ka faa’iidayso inta aanad mashquulin

5. Noloshaada ka faa'iidayso inta aanad geeriyoon."
xadiisku waxa uu ka mid yahay xaadiista lagu tilmaamo. [جوامع الكلم] in Rasuulku SCW erayo yaryar sheego, laakiin macnaha iyo mucda ay xanbaarsan yihiin aad u xeeldheer yihiin, kalmad kastana u baahan tahay fahan aad u xeeldheer. Qofku waxa uu fahmaa qiimaha ay dhallinyaranimadu leedahay marka uu waynaado ee itaalkiisu soo gaabto. Caafimaadka waxa aad dareemaysaa maalinta aad saaran tahay joodariga (firaashka) geerida. Hoddontinimada waxa aad dareemasaa maalinta aad sabool noqoto. Qiimaha wakhtiga waxa aad dareemaysaa marka ay saacadaha iyo sannadadu kusoo maraan adiga oo aan waxba qaban noloshuna macno la'aan kaa noqoto. walaalkayga iyo walaashayda dhallinyarada'ahow ayaa kuu soo celin kara haddii uu ku dhaafo wakhtigaas qaaliga ah?
Geeridu waa kadis dhallinyaranimo waad ku geeriyoon kartaa. Geeriduna cidna ma sugto dhalliyaro iyo gabaw taano ma taqaano ka faa'idayso Kaanshada/fursadda inta aad nooshahay, haddii kale hadhaw ayaad murugoon doontaa, wakhti aanay murugo waxba Qaban doonin.

SABABTA 2AAD: Maqnaanshaha ku Dayashadii Tognayd

Dhallinyarada ummadda islaamka waxa ku dhacay arrin aad u halis ah, oo ah in ay waayeen ku dayashadii wanaagsanayd, waana sabab ka mida sababaha dib u dhaca ku keenay dhallinyarada islaamka. Tarbiyeeyaha ay iswaydaarsan yihiin hadalkiisa iyo falkiisu waa mid dib u dhac ku keeni kara dhallinyarada. Allah waxa uu ku leeyahay qur'aan:
{كبر مقتاً عند الله أن تقولوا ما لا تفعلونَ)
"waxa waynaaday cadho ahaan Alle agtiisa in aad tidhaahdaan wax aydaan samaynayn."
Siday suurtogal ugu tahay Aabaha in uu ku yidhaah caruurtiisa ha cabina Sigaarka isigoo aanay gacantiisa ka dhammaanayn Sigaarku! Siday suurogal u tahay in uu caruurtiisa ku yidhaa "ixtiraama jaar keena" isiga oo aan isba la hashiis ahayn! Siday suuragal u tahay in uu kula dardaarmo in ay faraxsanaadaan isiga oo mar kasta cadhaysan! Waxa aad falayso ayaa ka awood badan waxa aad sheegayso. Siday macalinka suurogal ugu tahay in uu ardaydiisa kala dardaarmo in ay naxariis badnaadaan, isiga oo ayna agtiisa oolin naxariisi! Isiga oo aan ilaalinayn wakhtigooda see ayay macquul u tahay in uu yidhaahdo "ilaaliya xoolaha ummadda, isiga oo aan dhawrayn wakhtiga xiisada uu dhigayo. Siday suurogal u tahay in uu askariga dhallinyarada kula taliyo in ay dhawaraan amaanka oo ay ka

ilaaliyaan qalalaasaha ummadda oo ay dadka kula dhaqmaan dhibirsanaan iyo fudayd, isiga oo aan isba kula dhaqmayn! Sidee ayay tarbiayada dhallintu ku toosi kartaa iyada oo aan ku dayasho toggani jirin? Waxa ay waayeen dhallinyarada islaamku ku dayashadii wanaagsanayd mid kasta oo innaga midi bal naftiisa dib haw baadho. Bal fiiriya cida aad ku dayanayso ee wax aad ka qaato. Bal u fiirso dhallinyarada aad isku dhawdihiin ama aad wada dhalateen, cida ay ku daydaan. Badhkood waxa ay ku daydaan fannaniin aan nolosha wax macno ah ka joogin. Qarkood waxa ay ku daydaan ciyaartooyo aan ahayn Islaam. Hadafka ay u nool yihiinba waa in ay noqdaan sida kuwaas oo kale. Qaar kood waxa ay ku dayanayaan hantiile xoolaha ummadda dhacay.

Maxay dhallinyarada islaamku ugu dayan waayeen midkii ugu wanaaga iyo sharafta badnaa ee aduunkan soo mara? Midkii alle qur'aanka ku sheegay ee uu yidhi:
(لقد كان لكم في رسول الله أسوة حسنة
(لمن كان يرجو الله والآخر وذكر الله كثيرا *"waxa idiinku sugan Rasuulka ku dayasho wanaagsan, waa cidii alle iyo maalinta aakhiro rajaynasa ee alle xusta, xus faro badan."*

Bal dib haw xasuusto qof kasta oo innaga mida ahi dhallinyarada uu yaqaano, oo si cad ha u waydiiyo su'aashan: waa kuma qofka aad ku dayataa? Bal taga goobaha Jaamacadaha oo waydiiya dhallinyarada joogta ayaad ku dayataan? Bal taga goobaha laga shaaho oo waydiiya dhallinyarada su'aashan: ayaa idiin ah cida aad ku dayataan ee aad nolosha kaga dayataan? Alla miyaynu bal tiro koon ka samayno inta ku dayata dadkaa aan faa'iidada lahayn iyo inta ku dayata Suubbanaha!
Dhallinyarada waxa ka mid ah kuwo ku dayda Zubayr iyo Dalxa. Waxana ka mida mid ku dayanaaya fannaaniin iyo ciyaartoy. Waxyaabaha mudan wax ka mida in aynu waydiino dhalinyaradeena ayaad ku dayataan? Aynu dib u eegno cida u ah cida ay ku daydaan. In aynnu ku dayano Suubbanaha SCW, ma'aha wax ka fog indhaheena allah ayaa inoo ilaaliyay Sunnadiisii, dariiqiisii iyo manhajkii uu adduunkan ku hantay.

Waxa wax alle loogu mahadnaqo ah in aynu helayno culimo iyo barayaal si sahlan innoogu faahfaahisa goob kasta iyo meel kasta oo ka mida dhulalka muslimiinta, waxa aad ka baran kartaa suunnadii Nabiga meel kasta oo aad joogto. Masaajidka, Jaamacaddaha ayaa ka mida. Waxa aad ka helaysaa goob kasta oo aad joogto dad caarifiin ah, oo aqoon buuxda u leh in ay kuu sharraxaan si aad u fahmi karto. Laakiin, waxa lagu kala tagay waxa weeyaan ayaa raba? Ayaa se u baahan? Waxa mihiim ah in aad baadho cidda aad ku dayanaso oo aad ka baadho taariikhda

islaamiga ah. Waxa aad ka heli kartaa Shakhsiyaad muslimiin ah oo ku dhagan diintooda adduunkan cusubna la jaan qaaday, mana aha wadan qudha. Dhammaan waxa ay joogaan waddamada muslimiinta ah, kagamana dayanasid dhinac qudha ee waxa aad kaga dayan kartaa qayb kasta oo ka mida dhinacyada nolosha sida dhinaca dacwada, shareecada, dhakhtarnimada, Injineernimada, ganacsiga iyo jaanib kasta oo nolosha ah rag iyo dumarba. Cidda aad ku dayanasaa hanaqoto qof diintiisa ku qaniinay gaws danbeedka, oo ku dhagtay shareecada rabigii.

Laga waayi maayo ummaddan ilaa maalinta qiyaame dad wanaagsan oo lagu daydo oo heer ka gaadhay arrimaha aduunka iyo mida aakhiraba, waa aad baadhi kartaa adiga oo u baadhaya si sax ah kana baadhaya meel sax ah. Muhiimadu maaha in laga eegaayo qofka xoolihiisa, quruxdiisa, ee muhiimadu waa akhlaaqdiisa iyo ku camal falka diinta. Mawduuca ku dayashadu maaha mawduuc sahlan ee waa mawduuc lagama-maarmaan u ah nolosha dhallinyarada. Tusaalayaashii aan soo qaadanay ee dhallinyaradii saxaabada iyo ciddii ka danbaysay ciddii ay ku dayanayeen waxa uu ahaa Rasuulka SCW waxa ay ku dhaganaayeen falkasta oo uu sameeyay hadal iyo ficilba mid kasta oo ka mida waxa uu u aha cidda uu ku daydo si guud. Haddana waxa ay lahaayeen cid ay si gaara ugu daydaan. Saxaabigii Usaame waxa tarbiyeeyay Sayid Binu Xaarith allah haka raali noqdee dhammaantood. Sayid Binu Thaabid waxa tarbiyaysay Saxaabiyadii Nawaara Bintu Maalik. Mucaad Binu Jumuux waxa tarbiyeeyay Camar Binu Jumuux. Waa kuwaas dhallinyaradii adduunka is badalka ka sameeyay. Dhallinyaradii islaamkow cidda aad ku dayanasaan hakaga dayanina arrimaha adduunka oo qudha ee kaga dayda masiirkiina danbe ee aakhirina.

SABABTA 3AAD: NIYAD JABKA

Waa sabab ka mida sababaha ugu waa wayn uguna muhiimsan, waa sababta aad ka daalacan karto wajiyada dhallinyarada. Waana sababta ka keentay kalmada waa bilaa faa'iido! Sida dhabta ah waxa waajib ah in aan la quusan oo ayna rajo la'aani dhicin, oo aan allah laga quusan in uu ummaddan karaamayn doono oo uu u suurto galindoona diinteeda uu kaga raalida yahay. Laakiin, dhallinnyaradu waxa xanuujiyay niyad jabka kaga yimi dhammaan dhinacyada nolosha, waxana ay kaga dhacday dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah. Waana sababta keensatay waaqica ay ku nooshahay ummadda islaamka, midaas oo ay dhallinyaradu ku arkayaan

indhahooda. middaas oo ay duntay dhinacyadii nolosha oo dhami, oo aynna ka raali noqdeen dadkii madaxda u ahaa ummadda. Midkaas oo ku dhacay qayb kasta oo ka mida ummadda islaamka. Waxa farqi ah oo innoo dhaxeeya majiro saamayntu waxa ay ku dhacday dhammaan ummadda islaamka dhinacyada nolosha ee rasmiga ah oo dhan. Waxa jira xaalado ka sii dara oo dib u dhacu saamayn wayn ku sii leeyahay: Waana dhinacyada siyaasadda, dhaqaalaha, aqoonta iyo ciidanka. Nasiibdarro midda ugu wayn waa akhlaaqda iyo anshaxa.

Waxa sii balaadhanaya farqiga u dhaxeeya waddamada muslimiinta iyo waddamada reer galbeedka middaas oo saamayn ku yeelanasa quluubta dhalinayarada. Sida ay taariikhdu sugayso waxa ay dhallinyaradu arkayaan in ay mar kasta dib u dhacayaan dawladaha islaamku, oo ay ka soo kabanayaan burburka ku dhacay. Waxana ay middaasi ku sababasaa in ay ka niyad jabaan noloshooda oo ayna dawladahoodu xor ahayn ee ay yihiin kuwa la guumaysto ama si toosa haloo guumaysto ama si dadbane. Waxa aad xasuusanaysaa marka aad maqasho dawlad islaam ah oo la guumaysto Falastiin. Laakiin, intaas waa ay ka badan yihiin waxa kale mida Ciraaq, Afgaanistaan, Shiishaan, Kashmiir, Suudaan, iyo Turkistaan ma'aha wadamo xor ah marka sida xaqiiqada ah looga hadlo. Waxa lagu hayaa wadamada musliminta tun-jilicsi siyaasadeed iyo mid qasab ah, waana badanka wadamada caalamka islaamka. Waxa ay soo saartay dhicida dawladahaas Islaamku fac ka niyad jabsan noloshooda iyo mida bulshadooda.

Haddaba side ayaa aan uga baxnaa dhibaatooyinkaa?

Aabo kasta, daaci kasta, macallin kasta iyo qof kasta oo danaynaayaa in ay ummaddani dib u kacdo, oo ay guulaysato oo ay liibaanto ha ogoodo in ayna ka suurgal ahayn fac niyad jabsan in ay ummaddan guul gaadhsiiyaan? Ummad niyad jabsan ma guulaysato! Waana xaqiiqo qadhaadh. Dhallinyarada waxa ku waajib ah in ay quluubtooda ku beeraan rejo. Dhaqanka quusashadu ka mid maaha dhaqamada Mu'minka. Allah waxa uu leeyahay (قال ومن يقنط من رحمة ربه إلا الضالون) *"kama quustaan naxariista rabbigood ilaa kuwa lumay mooyaane."* Si kasta oo ay dhacdooyinku ahaadaan, iyo si kasta oo ay arrimuhu u fara bataan. Nasteexada runta ah ee idiinka soo baxaysa qalbigayga waxa weeyaan: Haddii aad aragtaan dumarka oo qaylinaya oo barooranaya oo carruurtoodii mid mid u waayaya, haddii aad aragtaan caruurta oo subax iyo habeenba la laynayo, haddii aad aragtaan mujaahidiinta oo la weeraro oo la go'doominayo, haddii aad aragtaan guryaha oo dumaya, dhulka oo go'aya, dalaga oo gubanaaya, haddii aad aragtaan dhiigga oo dareeraaya, dadka dhintay oo aan loo hayn meelo lagu aaso, waxaas oo dhan

haddaad aragtaan iyo wax ka daran ha quusanina. Naxariista rabbi kama quustaan ilaa dadka gaalada ah mooyaane. Dadkii aan dar alle aan u jeclaayow qabsada xaqiiqadan Culus.
Waxa aad ogaataan in uu allah dhulkan dhigay Sunno aan is badalin oo aan doorsoomin wax kasta oo dhaca.
(إن يمسسكم قرح فقد مس القوم قرح مثله وتلك الأيام ندولها بين الناس)

Haddii ay maanta tahay ummada islaamku mid dhaawacantay waxa jirtay wakhti ay caafimaad qabtay. Waxa iman doonta wakhti ay ka caafimaadi doonto dhaawaca soo gaadhay. Middaasina waa mid hubaal ah, oo ay soo noqon doonto dawladii islaamku. Waxa aad ogootaan in ay ummaddani ay dabeecaddeeda ka mid tahay in ay xanuunsato oo ayna dhiman (أُمة تمرض لا تموت) waxa ay kaga duwan tahay Ummaddaha kale waa ay daciiftaa ee ma dhimato wakhtina waa ay xoog badan tahay, wakhtina waa ay daciiftaa. Ummaddani waxa ay xanbaarsam tahay waa kalmadii ugu danbaysay ee allah dhulka u soo dajiyo, suurtogalna maaha in ay dhimato waa mid allah ilaashanayo waana hubaal in ay dib u soo kici doonto, wakhti wakhtiyada ka mida. Tegista Ummaddana waa dhammaadka dhulkan. Ogooda in ayna u dhaxayn loollan kani koox ka mida muslimiinta iyo koox gaalo ah, ee waa loollan u dhaxeeya allah iyo kuwa raba in ay dumiyaan sharcigiisa iyo diintiisa.
(ويمكرون ويكر الله والله خير الماكرين)

Ogaada bushaarada ku jirta kitaabka qur'aanka ah, iyo Sunnada Nebbiga SCW. Ogaada in uu alle ballanqaaday in uu u hiilin doono ummaddan islaamka ah.
(وكان حقاً علينا نصر المؤمنين) *"waxa xaq igu ah in aan u gargaaro Mu'miniinta."* Naguna SCW waxa uu yidhi:
(إن الله زوى لي الأرض فرأيت مشارقها ومغاربها وإن أمتي سيبلغ ملكها ما زوى لي منها)

Ogaada in mar kasta oo aan taariikhda dhacno aan haddana istaagno. Waxa aynnu dhacnay haddii aynu nahay Ummadda islaamka markii Rasuulku SCW geeriyooday ee dadkii diinta ka noqdeen, haddana waynagii kacnay ee dib ummaddii ugu laabatay sharcigii allah.

Sababta 4aad: Baraha Bulshada

Kaalinta ay warbaahintu ku leedahay qiyamka, dhaqanka iyo fikirka dhallinyarada waa kaalin aad u wayn. Haddii aynnu ku sheegnay barbaarintu in ay ka mid tahay labada garab, baraha bulshaduna waa labadaa garab ee saamaynta ku leh dhallinyarada mid ka mida. Waa mid ka mida waxyaabaha is baddalka ku sameeyay dhalinyarada Islaamka, waxa lagu soo baahiyaa farriimo saamayn ku leh dhallinyarada. Warbaahinta aan ka hadlayaa maaha warbaahinta reer galbeedka iyo mida reer bariga toona, ee waa barbaahinta dhulalka Islaamka. Waxa lagu bixiyaa sidii loo burburin lahaa maanka dhallinyarada xoolo iyo hanti fara badan. Si loo kiciyo dareenka dhallinyarada oo loo faafiyo liidasho oo dhan iwm. Qaar koodna waxa ay faafinayaan wax kasta oo akhlaaqda ka soo horjeeda sida filimada galmada. Waxana looga gol leeyahay in lagu burburiyo oo lagu dilo dhaqan iyo qiyamka toosaan, ilaa aynnu gaadhnay in aan ka daawano TV-yada guryaheena yaalla wax kasta oo ka fog akhlaaqda wanaagsan iyo qiyamka toosan.

Qaar kale waxa ay ka shaqaynayaan sidii loogu dheel-dheeli lahaa diinta islaamka iyo islaamnimada iyaga oo ku tilmaamaya dadka diintooda haysta dadka nolosha dib uga dhacay oo aan la haysan magacyada ay u bixiyeen wax ka mida Argagixiso! Sababta ay sidaa u leeyihiina waa in ay yihiin dad ku dhaqma diintooda. Qaar kood waxa ay u sawirayaan dadka islaamka diin nabad-galiyo in tahay oo aanay lahayn dagaal iyo Jihaad toona, middaasi waa xaqiiq in ay tahay diin nabad-galiyo. Laakiin maaha diinta islaamku mid aan lahayn wax iska dhicin iyo in ay dadka marmarka qaar dagaal kula gorgortanto. Qaar ka mida waxa ay ka shaqaynayaan sidii ay dacaayad uga fidin lahaayeen taariikhda Islaamiga ah, waxa ay ka dhigayaan taariikh ka samaysan dulmi iyo dagaal qudha oo aan lahayn wax wanaag ah, oo dadka taariikhda ku suntan yihiin dad qalqalafsan oo aan ahayn dad diirka naxa lahayn. Haddii ay doonaan in ay ka sheekeeyaan taariikhda qof islaam ah, haddii ay dhinac ka amaanaan dhinaca kale ayay ka caayayaan. Waxa jira kooxo innoo qurxiya wax qabad kasta oo uu sameeyo mid kasta oo munaafaq ah oo ummada islaamka khiyaama, waxa aad arakaysaa oo aad dhagaysanaysaa ama akhrinasaa, boqolaal dhaleeceen oo loo jeedinaayo Islaamka, oo lagu waji xumaynayo midaas oo yoolka ka danbeeyaa tahay in la niyad jabiyo lagu rido oo lagu burburiyo hanka iyo hadafka dhallinyarada. Awood iyo xeeladba allah ayaa iska leh.

Waxaas oo dhagar iyo dabin ah waxa loo baahan yahay in ayna dhallinyaradu ku dhicin. Mana’aha markii koobaad ee ay dhacayso in sidii lagu samaynayo Islaamka. Haddii aad taariikhda akhrido waxa aad ku arkaysaa in ay waligeedba soo jirtay. In Islaamka la dhaleeceeyo ilaa wakhtigii Rasuulka SCW la soo diray ilaa wakhtigii ka

horraysay ilaa hadda waxa uu ku guulaysanayaa qofka dhallinyarada ah in aanu ku saamoobin waxaas oo magac dilka islaamka ah iyo in uu isku dayo sidii uu wax uga qaban lahaa oo islaamka u difaaci lahaa af iyo adinba oo is hortaagi lahaa kuwa waxaas wada inta ay donaan ha lee kaadaane. Ogow midkasta oo ay saamayn ku yeelatay oo dhallinyarada islaamka ka mid ah, ha ogaado waa imtixaan xaga alle ka yimi oo lagu imtixaamayo mid ay saamayn ku yeelato allah caasiyo iyo midka naftiisa xakameeya allah adeeca, ee imtixaanka ku dhaca waana midaas u jeedada ka danbaysaa in Allah ku imtixaano dhallinyarada islaamka. Haddii aad naftaada ka adkaatay waad guulaysatay haddii kale waad ku dhacday imtixaankaas ee dib ugu noqo naftaada. Waxa looga baahan yahay dhallinyarada ka run sheegay islaamnimadooda, in ay iskaga dheeraadaan dagalada lagu baahiyo wax yaabaha dila dhaqanka wanaagsan iyo akhlaaqda. Wax diidayaa ma jiraan in aad gasho baraha bulshada oo aad dhinaca wanaagsan u adeegsato, adiga oo ku soo gudbinaaya wax adduunkana faa'iido leh, aakhirna aan laguu qabsanayn, adiga oo aan been iyo marin habaabin soo gudbinayn, majiro wax diidaaya in laga faa'iidaysto barahaas ummaduhu kuwa xidhiidhaan. Waxa aad ka abuuri kartaan kanaalo iyo wargayso islaami ah oo aad wacyiga dhallinyaradiina iyo ummadaada aad kor ugu qaadi kartaan. Waxa aad ka samayn kartaa dhaqaale ummadda islaamka ah lagu caawiyo waa waxtar. Waxa aad ku soo gudbin kartaan wax kasta oo ummaddiina aad ugu faa'iidaynaso aakhiro iyo adunkaba.

Talooyin Dhalinyarada ku socda

Wiilka dhallinayarada ah iyo hablaha dhallinyarada ah ee muslimiita ahow, haddii aad jeceshiyiin in aad guulaysataan adduun iyo aakhirba waxa lagama maarmaan ah in aad Jacaylkaas aad u badashaan go'aan dhab ah oo aad joogtaysaan, kuna dadaashaan sidii aad uga dhabayn la haydeen. Wadadu ma'aha mid fog cidii u dadaasha ee alle u fududeeyo, waa ay sahlan tahay haddii aad dadaasho. Alle waa qalbi jire waxa uu og yahay midka fasahaadka wada iyo midka wanaagga wada iyo Isha wax Khiyaamaysa iyo wax yaabaha laabaha lagu qariyo. Haddii aad doontaan sarraynta ummaddiina, haddii aad doontaan in ay idiin soo noqoto Sharaftii ummadiinu middaas oo ay dheeraatay sugideedo, haddii aad doontaan in Ummadiinu ka baxdo duliga iyo liidashada hadda bilaaba. Ha dagdagina, hana dadajisanina. Hadda bilaaba alle waxa uu idiin furi doonaa irridaha naxariistiisa.

Waxa aan bixin doonaa 10 talo oo gaagaaban oo dagdag ah waxa aad ogaataan in mid kastabana in ay u baahan tahay in buug gooniya laga qoro oo lagu faah-faahinayo.

TALADA 1AAD: KA BAX MACAASIDA

Waxa xaqiiq ah in arrinta ugu daran ay tahay in ay dhallinyaradu dhex quuseen macaasida! Macaasidu waa arrin (albaab) aad u khatar badan, waxa ay kaga daran tahay insaanka yayga dilaaga ah. Haddii ay quluubta ka buuxsanto macaasidu waxa ay ku sababtaa in uu qalalo oo ay daxalaysato laabtiisu. Haddii la waaniyo waano ma qaadanayo, haddii lagu dul akhriyo waano ma qaadanayo, iskaba dhaaf xataa haddii qur'aan lagu akhriyo ma khushuucaayo. Haddii uu arko arrin murugo leh ma murugoonaayo waxa aad moodaa in aanu arag! Waxaas oo dhan waxa ay ka dhashaan in macaasida la dhex dabaasho. Run ayuu sheegay Rasuulku SCW markii uu lahaa:

(إن المؤمن إذا أذنب كانت نكتة سوداء في قلبه، فإن تاب ونزع واستغفر صقل قلبه، فإن زاد زادت فذالك الران الذي ذكره الله في كتابه (كلا بل ران على قلوبهم ما كانوا يكسبون)

"Qofka Mu'minka ah marka uu danbaabo waxa ahaata Qalbigiisa Bar madow. Haddii uu Toobad kaano uu soo laabto oo uu Allah danbi dhaaf waydiisto waa laga tirtiraa." Waana midda uu Allah Qur'aanka ku sheegay.

Macaasida oo laga tago dhallinyaro waxa lagu tilmaamaa acmaasha ugu fadliga badan. Midka macaasida iska dhaafay ee aan qur'aanka akhriyin ayaa ka wanaagsan oo ka fadli badan midka macaasida dhex dabaalanaya ee haddana qur'aanka akhrinaya. Waxa uu Suubanuhu leeyahay *"wixii aan idiin diido iskaga taga, wixii aan idin farana ka sameeya in taad awoodaan."* Cumar Ibnu Khadaab waxa uu odhan jiray," *waxa aan idiinka dardaarmayaa in ay daan alle caasiyin idinka oo ku jira Jihaadka."* Macsiyada ugu darani waa adiga oo ku dadaalaya macsida midaasi wax ay ku tusinaysaa in ay naftaadu fasahaadsan tahay u dagdag sidii aad u hagaajin lahayd, haddii kale waxa ku soo mari sanado iyo sannado idiga oo ku sugan sidaadii oo aan wax isbadal ah samayn. Waxana aad ku socon uun wadadii aad ku socotay iyo mid ka sii liidata. Dhallinyaro waxa aad ogaataan in aad ka baxdaan oo aad go'aamsataan in aanad dib ugu laaban doonin macaasida waxa ay noloshu kuu furaysaa baal cusub oo cad oo aad alle la leedahay. Allah danbiga oo dhan waa dhaafaa towbadana waa uu ka aqbalaa adoomihiisa xumaantana waa ka dhafaa waanu u soo dhawaadaa adoomihiisa u soo dhawaada. Ku dadaal in aanad dib u dhigan tawbada aad maanta awoodo. ilbiqsi dib haw dhigan naftu waa

ay bixi kartaa wakhti kasta oo aad joogto, naftu waa bixi kartaa, bixitaan bilaa soo noqosho ah waxana ay u tagi rabbigii abuuray. Dhimashadana dib looma dhigo xaalad kasta oo aad ku sugan tahay waa aad geeriyoon kartaa. Allah waxa uu amaanay kuwa markasba towbad keenaaya.
(ثم يتوبون من قريب)
"waxa ay towbad keenayaan iyiga oo dhaw."

Yacnii iyaga oo aad ugu dhaw danbigii ay galeen ayay isla markaasba towbad keenayaan. Adoonku danbigiisa wakhti badan ma'sii haysto. Waxa aad badisaa in aad allah mar kasta ka barido in uu danbigaaga dhaafo, oo uu ceebtaada asturo. Allah waa mid adoomihiisa u dhaw waxaana shaki ku jirin in uu baryadaa aqbalaayo. Waxana aad ka arkaysaa arintaa in aad ka dareemayso naftaada in uu allah ku jeclaysiinaayo samaynta wanaaga oo aad niyad u hayso samaynta wanaaga una degdegayso gudashada wanaaga, adiga oo ka cabsanaaya cidhibta danbe ee xumaantii aad samayn jirtay. Haddii aad aragto adiga oo dhagaysanaaya wanaaga oo dhagaysanaaya qur'aanka iyo xadiiska suubanaha SCW. Alle u mahadceli, mahadcelin badan, adiga oo uga mahadcelinaaya in uu qalbigaaga toosiyay, una degdeg in aad shaqaysato wanaag; si aad naftaada wanaaga ugu xidhid. Haddii aad arki waydo is badalkaas baadh naftaada adiga oo ka baadhaya danbi qarsoon iyo mid muuqdaba. Waxa uu noqon kartaa eegmo, xan ama waalid caasinimo haba yaraatee. Waxa aad ka digtoonaataa danbiyada yaryar haddii ay biiraan waxa ay qalbiga ku sababaan madaw. Ogow mana jiro danbi ka wayn Istiqfaarta. Waxana aad xasuusataa xadiiskii Nabiga SCW "wax aan idiin ka digayaa danbiyada la yaraysto waana sidii dad degay tog dhexdiis, oo mid kasta oo ka midi soo qaaday xaabo oo ay roodhidoodii (Rooti) ku dubteen, danbiyada yaryari marka ay qabtaan qofka sameeya waa ay halaagaan." Danbiyada yaryar waa kuwa uu adoonku fududsysto samayntooda marka ay ku bataan waa ay halaagaan. Allah ayaan waydiisanaynaa cafis innaga iyo dhammaan muslimiintaba.

TALADA 2AAD: BARO DIINTAADA.

Sidee ayay suurtagal u tahay in aad ku xidhanto diin aanad garanayn? Sidee ayay Suurogal u tahay in aad ku dhagto sunnada aan kuu caddayn? Sidee ayaad wado u mari kartaa adiga oo aan baran?

Sannado iyo bilo ayaa ku dhaafay adiga oo aan garanahayn diintaada wax kugu filan! Wakhtigan la joogo waa in aad akhrido oo aad barataa diintaada. Diinta islaamku waa diin wayn macno kasta oo ay kalmadaasi xanbaarsan tahay. Waynideedana ma'koobin qof iinsaan ahi. Waa diin xukun, waxana xukmay rabbigii samada iyo dhulka. Waxa uu curiyay curin mida ugu wanaagsan. Waa uu dhamays tiray waxbana kama dhina. Waxa uu ku tiiriyay gallada ugu way nee muslimiintu haystaan.

(اليوم أكملت لكم دينكم وأتممت عليكم نعمتي ورضيت لكم الإسلام ديناً)

"Maanta ayaan idiin dhammaystiray diintiinii, galladaydiina kor kiina ayaan yeelay waxana aan idinkaga raali noqday diinta Islaamka."

Si aad u garato waxa ay diintaadu iyo aduunkaagu ku hagaagayaan waxa aad u baahan tahay in aad wakhti ku filan geliso barashada diintaadan dhamayska tiran iyo dadaal hagar la'aan ah si aad u gaadho meesha aad rabto. Aqoonta Islaamku madhammaato curinta culimada Islaamkana lama soo koobikaro.Waxa aad u baahan tahay in aad ka barato cida gacanta ku qabata si aad u barato diinta Islaamka talaabo talaabo si aanad u marin wado qalloocda.

Ka bilow safarkaaga cusub barashada qur'aanka iyo tafsiirkiisa si fudud. Sidoo kale xadiista Nabiga SCW waana labada sees ee diinta lagu taagay. Intaa ka dib qorshee sidii aad ku baran lahayd aqoonta Islaamka inta soo hadhay adiga oo talaabo talaabo u baranaya, adiga oo aan marqudha isku wada qaadayn, kalana tashanaaya culimada aqoonta u leh, in ay ku siiyaan jadwal cad oo aad u raacdo sidii aad u baran lahayd, kaas oo koobsanaya caqiidadii, fiqhigii, siiradii Rasuulka SCW iyo dhammaan culuumta Islaamka ee badan. Waxa aad mudnaan aad ah siisaa siirada Nabiga SCW siiradu waa qur'aankii oo uu Nabigu SCW ku dhaqmaayo. Waana waxa aad ka qaadan karto wax yar iyo wax waynba oo diinta ka mida. Waxa kale oo aad mudnaan siisaa in aad akhrido taariikhdii saxaabada, waayo waa kuwii diinta inoo soo xanbaaray waana cidii sida dhabta ah ugu dhaqmay diintan. Waa cidii uu alle u doortay in ay Rabigiisa SCW gaashaan u noqdaan, oo ay diinta sii gudbiyaan isiga dabadii.

Intaas ka dib akhri oo kabogo taariikhda Islaamiga ah, idiga oo ka akhrinaaya ilaha saxan, kana fogaanaaya meelaha qalloocan ee been-abuurka ah. Waxa aad u kaashataa qof baac-dheer u leh daraasaynta taariikhda. Taariikhdu waxa ay ka mid tahay wax yaabaha laga ilaaliyay been-abuurka. Sidaas ayaad ku helaysaa aqoon, waxana aad u baahan tahay in aad wakhtigaaga ka faa'iidaysato oo aad iska dhaafto in aad meelahaas iska fadhida sida maqaaxiyaha adiga oo dayacaya Wakhtigaaga.

Saacadahaaga iyo Maalmahaaga ayaad aqoontaas ku xaqiijin kartaa haddii aad wakhtigaaga ka faa'iidaysato.

Ogow barashada cilmigu waa waddo ka mida waddooyinka Jannada loo maro sida uu Nabigu sheegay.
(من سلك طريقاً يلتمس فيه علماً سهل الله له به طريقاً إلى الجنة)
"Qofka qaada (mara) wadiiqo uu ku raadinayo Cilmi waxa loo fududeeyaa waddada Jannada.

TALADA 3AAD: KU XIDHNOW MASAAJIDKA

Masaajidku: waa qayb wayn oo ka mida nolosha dhallinyarada, in Salaada jamac lagu tukadaa maaha oo qudha in ajarka la badsanayo. Masaajidku waa ilaaliyaha bulshada wadar iyo waaxidaba.
(إنما يعمر مساجد الله من امن با الله واليوم الاخر*) "Masaajidka ilaahay waxa camera cidii alla iyo maalinta aakhiro rumaysan."* Qofka camiraaya waa qof rumaysan alle iyo maalinta aakhiroba sida qur'aanka ku cad. Dadku marka ay masaajidka salaada lagu wada tukanaayo waxa ay ka midaysan yihiin quluunta, waana meesha layskaga war hayn karo haddii aad maqnaato mudo waxa macquul ah in lagu tebo oo ay dadku kaa war hayaan. Masaajidku waa meesha aad salaadaada ku toosin karto khushuuc ahaan. Salaada aad masaajidka ku tukataa waa ay ka ajar badan tahay mida aad ku tukato gurigaaga. Sida uu Suubanahu sheegay
(صلاة الجماعة تفضل صلاة الفذِّ بسبع وعشرين درجة)*"Salaada jamaca lagu tukadaa waxa ay dheertay mida kalinimada lagu tukado 27 darajo dhinaca ajarka." Xadiis kale waxa uu ku sheegayaa rasuulku N.N.K.H. "qofka u kalaha masaajidka ama u caraaba waxa uu alle Jannada ugu diyaariyaa guri mar kasta oo uu kalaho ama u caraabo."*

TALADA 4AAD: NOQO MID SAREEYA

Waxa ay aaminsan yihiin dhallinyaro badani haddii lagu yidhaahdo "Diinta ku dhaqma" in ay taasi tahay in uu masaajidka fadhiya oo qudha oo uu joogteeya akhriska qur'aanka iyo Salaadaha oo uu waxbarashadiisa dayac, oo wadada Jannada loo maro qudha ay tahay wadada cilmiga sharciga oo qudha. Fahan kaasi waa mid aan sax ahayn. Shaki kuma jiro in ay tahay wadada Jannada se, in aad

waxbarashadaada heer sare ka gaadho waa arrintaas uu dhiirinaayo islaamku. Dawlada caalamku waxa ay u qayb samaan laba qaybood: Qaar horumaray iyo kuwodib u dhacay, midaasi oo la xidhiidha aqoonta. Caqli-gal maaha in ummad dastuurkeedu ku bilaabmo kelmeda Akhri (إقرأ) in ay noqoto ummad dib u dhacday aqoon-ahaan! Waxyaabaha naftayda saamaynta taban ku reeba wax ka mida, in aan arko qof dhallinyar ah oo ku fiican ku dhaqanka diinta qur'aanka akhrinaya, salaada khushuuc ku tukanaaya, diinta dadka ugu yeedhaya, haddana ku fashilmay waxbarashadii! Islaamnimadu sidaa ma sheegaso, waxana ay sheegaysaa in uu qofku ugu sarreeyo waxa uu doono haku takhasusee iyo in aad si dhaba u qabato shaqo kasta oo aad qabanaso. Haddii aad doonayso walaalkayga iyo walaashayda dhallinyarada ahey in aad wanaajisaan xaalka ummadiina oo aad kor u qaadaan meeqaamkooda waxa lagama maarmaan ah in aad meel sare ka gaadhaan waxbarashada. Ogaada dhallinyaro in aynaan doonayn oo qudha dhakhtar, Injineer iyo barayaal e, waxa aynnu doonaynaa waa dhakhtar caalim ah, Injineer hal-abuur leh, iyo macalin wax soo saar leh. Ogow haddaad ku dadaasho in aad ku sarrayso waxbarashadaada oo aad kaga qayb qaadato sarraynta ummaddaada waxa aad helaysaa xasanaad aan cidna soo koobi karayn. Alle waxa aan u waydiinanaa dhallinyarada in uu ka dhigo kuwa meel sare gaadha.

TALADA 5AAD: XIDHIIDHI EHELKAAGA

Sida dhabta ah qoysaska Muslimiinta ah waxa ay ku nool yihiin dhibaatooyin. Waana dhibaata ah in qoysaskii waa waynaa ay u sii kala googa'ayaan kuwo yaryar. Waxa dhacda in sannado iyo bilo dhan laga yaabo in aanu walaalku warsan walaalihiisa kale ama aanu adeerku warsan caruurta uu adeer u yahay amaba aanu ka warhaynba ofka dhallinyarada ahi adeeradii iyo abtiyaashii. Kala go'naanta qaraabadu waxa ay sababtaa dhibaatooyin badan. Ummadda kala daadsanina kama gudubto dhibaatada. "Alle waxa uu abuuray uunka markii uu dhameeyay ayaa waxa istaagtay qaraabadii, waxana ay tidhi "halkaas waa halkii qofka jara qaraabada" Alle waxa uu ku yidhi qaraabadii miyaanad ku raali ahayn in aan jaro cida ku jarta oo aan xidhiidhiyo cida ku xidhiidhisa." Xadiis.

Haddii aad xidhiidhiso qaraabada adiga alle ayaa ku xidhiidhinaya, haddii aad jartana alle ayaa ku jara. Qof kasta oo innaga mida haku dadaalo in xidhiidh wanaagsan uu la yeesho qoyskiisa, hana isku dayo sidii u wanaajin lahaa wixii dhiba ee ka dhex jarta. Si kasta oo aad u weynaato oo aad heer u gaadho, haddana waalidkaa marna dhaafi maysid. Dhallinyarada badhkood waxa ay naftooda u

arkaan in ay horumaray oo iska waynaysiiyo si kasta oo aad heer u gaadho marna isma bar-bar dhigi kartid Aabahaa iyo Hooyadaa.

TALADA 6AAD: DOORO SAAXIIBKAA

Si kasta oo aad wadada toosan u marto haddana saaxiibka xumi waxa uu kuu celinayaa hoos, ha odhan annigu waxa aan ilaalinayaa naftayda. Qofka dhaqankiisa, dabeecadiisa iyo akhlaaqdiisu waxa ay ku xidhan yihiin dhaqanka, dabeecada iyo akhlaaqda qofka uu saaxiibka la yahay. Macnaha hadalkan waxa xadiis ku sheegay Rasuulka N.N.K.H
(المرء على دين خليله فلينظر أحدكم من يخالل)
"Qofku waxa uu ku sugan yahay diinta saaxiibkii ee midkiin ha iska eego cidda uu la saaxiibayo." Haddii aad doonayso wado aad Jannada u marto samayso saaxiib wanaagsan. Xadiis kale waxa suubaneheennu ku sheegayaa: من أراد بحبوحة الجنة فليلزم (الجماعة)
"Qofka doonaya Jannada balaadhkeeda ha ogaado in uu la jiro jamaacada muslimiinta." Haddii aad doonayso in aad shaydaanka ka guulaysato ha la dagaalin keligaa! Rasuulku N.N.K.H waxa uu leeyahay. *"waxa aan idiinka digayaa kelinimada shaydaanka waxa uu la jiraa waa qofka qudha labada qof xataa waa uu ka fogyahay."* Dooro saaxiib wanaagsan oo haddii aad salaadda hilmaanto ku xasuusiya haddii aad akhriska qur'aanka ilowdo kugu baraarujiya, haddii ay dhibaato ku haysato ku garab is taaga.

TALADA 7AAD: GARO XILLIGA AAD NOOSHAHAY

Dhallinyarada badhkood waxa ay sifiican ugu dhaqmaan diintooda waxa ay ku mashquulsan yihiin sidii ay u baran lahaayeen aqoonta islaamka iyo aqoonta kale ee la dhigtaba aad ayey u daneeyaan. Laakiin, waxa ay ku nool yihiin jasiirad go'doonsan oo badda ku dhex taala. Side ayaa suurtagal u tahay in aad ka damqanayso xaalada ummaddaada, haddana aanad ka war hayn xaalkeeda? Haddii aad ka damqanayso waxa loo baahan yahay in aad la socoto xilliga aad nooshahay, uma jeedo halka aad ku nooshahay oo qudha e, waxa aan u jeedaa in aad la socota xaalka dawladaha Islaamka iyo adduunka dhammaantii. Suurtogal maaha in uu qofku ku fikiro isbaddal isiga oo aan aranahayn wadooyinka loo maro isbaddalka iyo duruufaha ku xeeran bulshadiisa. Rasuulku N.N.K.H waxa uu uga sheekayn jiray asxaabtiisa dhacdooyinka ka dhaca hareerahooda ilaa wakhtigii aanay awooda lahayn, waxa uu uga sheekayn jiray boqortooyinkii reer Faaris iyo reer Ruum sida

ay u dhisan yihiin sida ay isku maamulaan iyo sida ay nool yihiin. Waxa uu uga sheekayn jiray Yaman iyo boqortooyadii Xabashida, sidaas ayay kula socon jireen waaqica ay ku nool yihiin. Waxa looga baahan yahay qofka dhallinyarada ah ee soo jeeda in uu la socdo wararka adduunka oo uu akhriyo joornaalada wararka laysagu gudbiyo, oo uu wax ka akhriyo arrimaha siyaasada, dhaqaalaha, arimaha bulshada iyo isbaddalada siyaasadeed ee dhacaya wakhtiga uu nool yahay. waa midkaas qofka wax ka qaban kara dibu dhaca ku yimi ummadda Islaamka.

TALADA 8AAD: NOQO MID XOOGAN

Tilmaamaha ugu muhiimsan waxa ka mida: xooganaanta jidheed wakhtiga dhallinyaranimada sida ay ugu baahan tahay ummaddu maskax xoogan ayay ugu baahan tahay jidh xoogan. Dagaalku waxa uu baahan yahay waa xoog, gacantii uu Mucaad Ibnu Camar ku daalay Abu Jahal waxa ay ahayd mid xoogan. Xooganaanta faa'iidadaa lehi waa mida ummadda wax u taraysa ee horumar u horseedaysa sida dabaasha, dhugtanka, isdifaaca nafsadeed in aad samayso waxyaabaha kaa dhiga mid xoogan. Rasuulku N.N.K.H waxa uu leeyahay:
(المؤمن القوي خير وأحب إلى الله من المؤمن الضعيف وفي كل خير) *"mu'minka xoogan ayaa ka khayr badan oo xaga Allah laga jecel yahay midka tabarta daran. Mid kastana waxa uu leeyahay khyr.*

TALADA 9AAD: ISKA DHAAF DADKA KALE

Haddli aad wanaajiso diintan oo aad ku dhaqanto, aadna macaansato in aad caabudo rabbigaa. Haddii aad dareento in ay wayn tahay mas'uuliyadda saaran dhallinyarada ee ah in ay ka qayb qaataan hagaajinta ummadda. Haddii aad dareento in ay xuntay nolosha ay ku nool yihiin oo ay ka fog tahay kitaabka alle ha iloobin aad ugu yeedho wadada toosan ee Islaamnimada. Ha hilmaamin in aad ugu yeedho asxaabtaada in ay maraan oo ay qaadaan wadadaa toosan. Ku noqo cida aad garanayso iyo asxaabtaada oo dhan haddii aad saaxiibo aad ku leedahay goobaha waxabarashada sida Jaamacada amaba Shaqada ay jiraan qaar aad isku meel aad dagan tihiin ama aad ku leedahay baraha bulshadu kuwada xidhiidho, ku noqo kuwaas oo dhan oo ugu yeedh diinta. Ugu yeedh wanaaga aad ku sugan tahay adigu; udir muuqaal oo mari baraha bulshada Telefoon ka wac wax uun samee! Waa midkaas dareenka walaaltinimadu iyo saaxiibtinimada dhabta ahi. Ugu yeedh nolosha wanaaga badan ee aad adigu ku sugan tahay. Suurayso wanaag kasta oo

ay qabtaan haddii aad sabab u noqoto ajar ayaad ku leedahay waayo adiga ayaa sabab u noqday. Rasuulku SCW waxa uu leeyahay. (الدال على الخير كفاعله)
“Qofka wanaag tusiya qof kale waxa uu ka dhigan yahay sidii qofkii sameeyay.”
Sidoo kale waxa uu alle qur’aanka ku sheegayaa:
(ومن أحسن" قولا ممن دعا إلى الله وعمل صالحاً وقال إنني من المسلمين")
“ayaa ka odhaah wanaagsan hadal ahaan qof dadka xaga alle ugu yeedhay oo camal wanaagsana sameeyay, oo yidhi waxa aan ka mid ahay muslimiinta.”

TALADA 10AAD: HABEE WAKHTIGAAGA

Ogow waa talo fudud marka si loo eego laakiin adag. Dhallinyaro badan wax dhib ah ku hayaan cidhiidhiga wakhtiga iyaga, oo moodaaya in aanay maalintu kuba filayn, iyaga oo qof kasta alle siiyay Wakhti ku filan. Laakiin, waxa loo baahan yahay inay habaystaan.
Waxa lagama maarmaah ah in aad dajiso oo aad habayso wakhtigaaga, oo aad wakhti galiso tagista masaajidka, wax-akhris, qaraabo xidhiidhin, waxbarasho, iyo wakhti nasasho. Waxa muhiim ah in aad garanayso maalin kasta waxa aad samaynaso ee aad qorshe leedahay. *Maxaad rabtaa in aad samayso berri? Maxaad rabtaa in aad samayso bishan*? *Maxaad rabtaa in aad samayso Sanadkan?* Meelee yoolkaaga oo u habee sida ay hawlahaagu u kala mudan yihiin. Qorshe kasta maalintiisa fuli adiga oo aan midna dib u dhigayn, si aad u gaadho cidii kaa dheeraysay. Haka xishoon in aad waydiiso su’aalo cida kaa aqoonta badan. Haddii uu kuu shaqayn waayo jadwalka aad dajisatay ha niyad jabin ee badal. Qof kastaaba noloshan marna waa uu kufaa marna waa guulaystaa.

Nolol cusub bilow Allah ayaa kula jiree. (والله معكم ولن يتركم أعمالكم) ogow waxa qudha ee aad haystaa aduunkan waa cimrigaaga haddii uu kaa tago badhkii waxa hubaal ah in aanu soo laaban doonin ka digtoomow in uu kaa dayacmo haddii uu dayacmana ma soo noqon doono ilaa maalinta qiyaame. Alle kaasho oo ha caajisin…. Ogow haddii aad garaacdo albaabka alle in aanad ku guul daraysanayn. Waxa uu kuu furi doonaa albaabada wanaaga oo dhan waxa uu kugu hanuunin doonaa wadooyinka wanaagsan oo dhan.

(والذين جاهدوا فينا لنهدينهم سبلنا وإن الله لمع المحسنين)

GABAGABO

Waxa aan hubaa in badan oo ka mida ah Odoyaasha da'da ah in ay jeclaan lahaayeen in ay maqlaan weedhan iyo talooyinkan wakhtigii ay dhallinyarada ahaayeen si ay ugu dhaqmaan, laakiin wakhtigii aayaa dhaafay dhallinyaranimadiina waa ay ka socotay, laakiin adiga ayaa maqlaaya maanta ku dhaqan inta aanay iman wakhti aad ka murugooto in laguu soo celiyo maalmaha. Alle waxa uu ku siiyay galado badan oo aanu siin qof kale waxa uu ku siiyay jidh xoogan, garaad wanaagsan, go'aan aad ka dhabayn kartid iyo muuqaal qurux badan. Alle waxa uu kuu diyaariyay in aad isbaddal ku samayso noloshaada oo xumaanta ku badasho wanaag, oo daciifnimada ku badasho xooganaan. Waxa laguu abuuray in aad adigu dunida badasho, laakiin laguuma abuurin in ay adiga ku badasho. Alle waxa uu kuu abuuray in aad naxariis u tahay dhulka, in aad wanaag u tahay dhulka, iyo in aad camiraad u tahay dhulka. Haku mashquulin arimo aan macno lahayn iyo dhacdooyin aan macno lahayn.

Haddii aad dareento daciifnimo iyo yaraan xeeladeed,
(فإن حسبك الله هو الذي أيّدك بنصره وبالمؤمنين)
Ku sugnoow Waddada Allah, iyo lasaaxiibista Mu'miniinta.
Ku soco wanaaga badan Jannada indhaha saar haddii alle ku soo hunuuniyay oo uu kugu soo hanuuniyay wadada toosan.
Ugu dambayn ha iga illoobin in aad habeenka dhaxdiisa ii soo ducayso. Waxa aan alle ka rajaynayaa in uu intaas iigu naxariistee.

(فستذكرون ما أقول لكم وأُفوِّض أمري إلى الله إن الله بصير بالعباد)

والسلام عليكم ورحمة الله وبركاته.